**Soo Koobitaanka Dheefaha iyo Caymiska (Summary of Benefits and Coverage, SBC) ayaa kaa caawin doona inaad doorato qorshe caafimaad. Soo Koobitaanka Dheefaha iyo Caymiska (Summary of Benefits and Coverage, SBC) waxay ku tusinaysaa sida adiga iyo qorshuhu u wadaagi lahaydeen kharashka adeegyada daryeelka caafimaad ee la daboolay. FIIRO GAAR AH: Macluumaad ku saabsan kharashka qorshahan (loo yaqaan qadarka lacageed ee cymiska ee bilaha ah) ayaa gooni loo bixin doonaa. Midan kaliya waa soo koobitaan.** Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan caymiskaaga, ama si aad u hesho nuqul kamid ah shuruudaha caymiska oo dhamaystiran, www.kp.org/plandocuments ama wac 1-888-901-4636 (TTY: 711). Qeexitaannada guud ee ereyada aadka loo isticmaalo, sida qaddarka la oggol yahay, baaqiga biilasha, caymiska wadaaga ah, Lacag bixinta wadaaga ah, lacagaha la jaro, daryeel bixiye, ama erayo kale oo hoosta ka xiriiqan, ka eeg Qaamuuska erayada. Waxaad ka eegi kartaa Qaamuuska erayada barta www.healthcare.gov/sbc-glossary ama wac 1-888-901-4636 (TTY: 711) si aad u codsato nuqul.

| Su'aalo Muhiim ah | Jawaabo | Maxay Midan Muhiim ah: |
|---|---|---|
| **Waa maxay guud ahaan lacagta la jari karo?** | $0 | Hoos ka eeg jaantuska Dhacdooyinka Caadiga ah kharashyadaada adeegyada qorshahan daboolo. |
| **Ma jiraan adeegyo la daboolay ka hor intaadan buuxinin lacagahaaga lagaa jaro?** | Ma jiraan. | Qorshahan waxa uu daboolayaa shay iyo adeegyada qaarkood xitaa haddii aanad weli la buuxinin qadarka lacagta la jari karo. Laakiin lacag bixinta wadaaga ah ama caymiska wadaaga ah ayaa lagu dabaqi doonaa. Tusaale ahaan, qorshahan wuxuu daboolayaa qaar ka mid ah adeegyada ka hortagga iyadoon la wadaagista kharashka iyo kahor inta aanad la kulmin lagaa jarayo. Ka eeg liiska adeegyada ka hortaga ee la daboolay www.healthcare.gov/coverage/preventive-care-benefits. |
| **Ma jiraan lacaga kale oo lagaaga jaro adeegyo kale?** | Maya. | Ma aha inaad buuxiso lacagaha lagaa jaro adeegyada kale ee gaarka ah. |
| **Waa maxay xadka lacagta jeebka laga bixiyo ee qorshahan?** | $1,200 Shakhsi / $2,400 Qoys | Xadka lacagta jeebka laga bixiyo waa lacagta ugu badan ee aad ku bixin karto hal sano gudaheed adeegyada la daboolay. Haddii aad xubno kale oo qoyskaaga ah ku leedahay qorshahan, waa inay la kulmaan xadkooda jeebka laga bixiyo ilaa inta qoyska guud jeebka laga bixiyo/u] laga buuxinayo. |
| **Maxaan lagu darin xadka lacagta jeebka laga bixiyo?** | Khidmadaha caymiska ee bilaha ah, baaqiga biilasha, daryeelka caafimaadka qorshahan ma daboolo, iyo adeegyada lagu tilmaamay shaxda bilaabma. bogga 2. | Inkasta oo aad bixiso kharashyadan, laguma xisaabinayao xadka lacagta jeebka ka baxsan. |
| **Ma bixinaysaa lacag yar haddii aad isticmaasho daryeel bixiye ku jira shabakada?** | Haa. Ka eeg www.kp.org ama wac 1-888-901-4636 (TTY: 711) liistada daryeel bixiyayaashaku jira shabakada. | Qorshan wuxuu isticmaalaa daryeel bixiyayaasha ku jira shabakada. Waxaad bixin doontaa lacag yar haddii aad isticmaasho daryeel bixiye ku jira shabakada qorshaha. Waxaad bixin doontaa lacagta inta badan haddii aad isticmaasho daryeel bixiye shabakad ka baxsan, waxaana laga yaabaa inaad ka hesho biil bixiyaha farqiga u dhexeeya kharashka daryeel bixiye iyo waxa aad u]qorshaha ayaa bixiya (baaqiga biilasha). La soco, daryeel bixiyahaaga shabakada ku jira ayaa laga yaabaa inay u isticmaasho adeeg bixiye shabakad ka baxsan adeegyada qaar (sida shaqada shaybaadhka). Ka hubi daryeel bixiyahaaga kahor intaadan helin adeegyada. |
| **Miyaad u baahantahay gudbin si aad ula kulanto takhasusle?** | Haa, laakiin waxaa laga yaabaa inaad adigu isu gudbiso takahsusle gaar ah. | Qorshani wuxuu bixinayaa qeyb ama guud ahaanba kharashka aad kula kulmayso takhasusle ee adeeg la daboolay ah laakiin waa inaad haysataa kaliya u gudbitaan inta aadan la kulmin takhasusle. |

Dhamaan kharashkalacag bixinta wadaaga ah iyo caymiska wadaaga ah lagu muujiyey jaantuskan waa kadib marka lacagaha lagaa jaro la buuxiyey, haddii lacagaha lagaa jaro khuseeya.

| Dhacdo Caafimaad ee Caadi ah | Adeegyada aad u baahan karto | Maxaad Bixinaysaa | | Xadidaadaha, Filashooyinka, iyo Macluumaad Kale oo Muhiim ah |
|---|---|---|---|---|
| | | Daryeel bixiye ku jira Shabakada (Waxaad bixinaysaa lacagta ugu yar) | Daryeel bixiye ku jira Shabakada aan ku jirin (Waxaad bixinaysaa lacagta ugu badan) | |
| **Haddii aad boqato xafiiska ama xarunta daryeel bixye caafimaad ahaaneed** | Booqashada daryeel bixiyaha koobaad si loo daaweeyo dhaawac ama jiro | Kharash la'aan ah | Aan la daboolin | Midna |
| | Booqashada Takhasusle | $15 / booqashadi | Aan la daboolin | Midna |
| | Daryeelka ka hortag ahaaneed/baaritaan/ talaalitaan | Kharash la'aan ah | Aan la daboolin | Waxaa laga yaabaa inaad bixiso adeegyada aan ka hortag ahayn. Weydii bixiyahaaga haddii adeegyada loo baahan yahay ay yihiin kuwo ka hortag ah. Kadib hubi waxa qorshahaaga ku bixin doono. |
| **Haddii baaritaan laga qaaday** | Baaritaanka cudur (raajo, shaqada dhiiga) | Kharash la'aan ah | Aan la daboolin | Midna |
| | Sawiritaan (baaritaanada CT/PET, MRIs) | $50 / booqashadi | Aan la daboolin | Ogolaanasho hore ayaa loo baahan yahay ama lama dabooli doono. |
| **Haddii aad u baahan tahay daawooyin lagu daweeyo jirradaada ama xaaladdaada caafimaad** Macluumaad badan oo ku saabsan caymiska daawada dhakhtarka qoro ayaa laga heli karaa barta www.kp.org/formulary | Daawada qiimaha u dhiganta<br><br>Daawooyinka macmalka ah ee la doorbido (Heerka 1) | $4 (tafaariiq);<br><br>$8 (tafaariiq);<br>$5 qiimo dhimis ah ee qaybsiga qiimaha tafaariiqda (ku dalbashada boostada) / daawada dhakhtarka qoray | Aan la daboolin | Ilaa 90-maalmood sahay (tafaariiq / ku dalbashada boostada). Iyadoo la raacayo hagitaanka habraaca. |
| | Shirkada daawooyinka la doorbidayo (Heerka 2) | $25 (tafaariiq); $5 qiimo dhimis ah ee qaybsiga qiimaha tafaariiqda (dalabka boostada) / daawada dhakhtarka qoray | Aan la daboolin | Ilaa 90-maalmood sahay (tafaariiq / ku dalbashada boostada). Iyadoo la raacayo hagitaanka habraaca. |
| | Aan ahayn daawooyinka la doorbidayo (Heerka 3) | Aan la daboolin | Aan la daboolin | Midna |
| | Daawooyinka Takhasuslaha | Waxaa lagu dabaqayaa kharas wadaagista qiimaha | Aan la daboolin | Ilaa 30-maalmood sahay (tafaariiq). Iyadoo la raacayo hagitaanka habraaca, marka la ansixiyo |

| Dhacdo Caafimaad ee Caadi ah | Adeegyada aad u baahan karto | Maxaad Bixinaysaa | | Xadidaadaha, Filashooyinka, iyo Macluumaad Kale oo Muhiim ah |
|---|---|---|---|---|
| | | Daryeel bixiye ku jira Shabakada (Waxaad bixinaysaa lacagta ugu yar) | Daryeel bixiye ku jira Shabakada aan ku jirin (Waxaad bixinaysaa lacagta ugu badan) | |
| | | daawada macmalka ah ee la doorbidayo ama shirkada daawada ee la doorbidayo. | | iyada oo loo marayo habraaca ka reeban. |
| **Haddii lagugu qalay bukaan-socod ahaan** | Lacagta Xarunta (tusaale, qaliinka xarun wareegta) | $50 / booqashadi | Aan la daboolin | Midna |
| | Lacagta dhakhtar/dhakhtar qaliin | Kharash la'aan ah | Aan la daboolin | Lacagta dhakhtar/dhakhtar qaliin waxaa lagu daray lacagta Xarunta. |
| **Haddii aad u baahan tahay daryeel caafimaad oo degdeg ah** | Daryeelka qolka xaaladaha degdega ah | $200 / booqashadi | $200 / booqashadi | Waa inaad kusoo ogeysiisaa Kaiser Permanente 24 saacadood gudahood haddii lagu dhigo daryeel bixiye aan shabakada ku jirin; kuna xaddidan xaalad degdeg ah oo bilowga ah oo keliya. Lacag bixinta wadaaga ah waa laga dhaafay haddii si toos ah isbitaalka loo dhigo bukaan-jiif ahaan. |
| | Gaadiidka daawada xaaladaha degdega ah | 20% caymiska wadaaga ah | 20% caymiska wadaaga ah | Midna |
| | Daryeelka degdega ah | Kharash la'aan ah | $200 / booqashadi | Daryeel bixiyeyaasha aan shabakadaha ku jirin ee la daboolay marka si ku meel gaar ah uga baxsan goobta adeegga. |
| **Haddii isbitaal lagu dhigo** | Lacagta Xarunta (tusaale, qolka isbitaalka) | $100/maalintii ilaa $500/isbitaal dhigitaankii, kadib Lacag la'aan | Aan la daboolin | Ogolaanasho hore ayaa loo baahan yahay ama lama dabooli doono. |
| | Lacagta dhakhtar/dhakhtar qaliin | Kharash la'aan ah | Aan la daboolin | Lacagta dhakhtar/dhakhtar qaliin waxaa lagu daray lacagta Xarunta. Ogolaanasho hore ayaa loo baahan yahay ama lama dabooli doono. |
| **Haddii aad u baahan tahay adeegyada caafimaadka dhimirka, caafimaadka hab-dhaqanka, ama isticmaalka maandooriye** | Adeegyada bukaan socod | Kharash la'aan ah | Aan la daboolin | Midna |
| | Adeegyada bukaan jiif | $100/maalintii ilaa $500/isbitaal dhigitaankii, kadib Lacag la'aan | Aan la daboolin | Ogolaanasho hore ayaa loo baahan yahay ama lama dabooli doono. |
| **Haddii aad uur leedahay** | Booqashooyinka xafiis | Kharash la'aan ah | Aan la daboolin | Iyadoo ku xiran nooca adeegyada, lacag bixinta wadaaga ah, caymis wadaaga ama lacagta la jaro ayaa lagu dabaqi karaa Daryeelka hooyada waxaa ku jiri kara baaritaanno iyo adeegyo lagu |

| Dhacdo Caafimaad ee Caadi ah | Adeegyada aad u baahan karto | Maxaad Bixinaysaa<br>Daryeel bixiye ku jira Shabakada (Waxaad bixinaysaa lacagta ugu yar) | Maxaad Bixinaysaa<br>Daryeel bixiye ku jira Shabakada aan ku jirin (Waxaad bixinaysaa lacagta ugu badan) | Xadidaadaha, Filashooyinka, iyo Macluumaad Kale oo Muhiim ah |
|---|---|---|---|---|
| | | | | qeexay meelo kale oo SBC ah (tusaale, sawiritaanka ultrasound). |
| | Adeegyada Xirfadlaha Dhalmada Dhalaanka/Dhalmada | Kharash la'aan ah | Aan la daboolin | Lacagta xirfadlaha waxaa lagu daray lacagta Xarunta. Waa inaad ku soo wargelisaa Kaiser Permanente 24 saacadood gudahooda kadib marka isbitaal lagu dhigo, ama sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah caafimaad ahaan. Adeegyada dhallaanka marka dhasha wadaagista kharashka way ka duwan yihiin midka hooyada. |
| | Adeegyada Dhalmada Dhalaanka/Dhalmada | $100/maalintii ilaa $500/isbitaal dhigitaankii, kadib Lacag la'aan | Aan la daboolin | Waa inaad ku soo wargelisaa Kaiser Permanente 24 saacadood gudahooda kadib marka isbitaal lagu dhigo, ama sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah caafimaad ahaan. Adeegyada dhallaanka marka dhasha wadaagista kharashka way ka duwan yihiin midka hooyada. |
| **Haddii aad u baahan tahay caawimo soo kabashada ama aad leedahay baahiyo kale oo caafimaad oo gaar ah** | Daryeelka caafimaad ee guriga | Kharash la'aan ah | Aan la daboolin | Ogolaanasho hore ayaa loo baahan yahay ama lama dabooli doono. |
| | Adeegyada baxnaaninta | Bukaan socod: Kharash la'aan ah<br>Bukaan-jiif: $100/maalintii ilaa $500/isbitaal dhigitaankii, kadib Lacag la'aan | Aan la daboolin | Lagu daray Adeegyada Baxnaaninta: Bukaan socod: Xadidaada 60 booqasho / sanadkii. Bukaan jiif xadidaada 60 maalmood / sanadkii, ogolaanasho hore ayaa loo baahan yahay ama lama dabooli doono. |
| | Adeegyada baxnaaninta | Bukaan socod: Kharash la'aan ah<br>Bukaan-jiif: $100/maalintii ilaa $500/isbitaal dhigitaankii, kadib Lacag la'aan | Aan la daboolin | Lagu daray Adeegyada Baxnaaninta: Bukaan socod: Xadidaada 60 booqasho / sanadkii. Bukaan jiif xadidaada 60 maalmood / sanadkii, ogolaanasho hore ayaa loo baahan yahay ama lama dabooli doono. |
| | Daryeelka kalkaalisada xirfad leh | Kharash la'aan ah | Aan la daboolin | xadidaada 60-maaliny / sanadkii. Ogolaanasho hore ayaa loo baahan yahay ama lama dabooli doono. |
| | Agabka caafimaadka ee waara | 50% caymiska wadaaga ah | Aan la daboolin | Iyadoo la raacayo hagitaanka habraaca. Ogolaanasho hore ayaa loo baahan yahay ama lama dabooli doono. |
| | Adeegyada daryeelka guriga | Kharash la'aan ah | Aan la daboolin | Ogolaanasho hore ayaa loo baahan yahay ama lama dabooli doono. |

| Dhacdo Caafimaad ee Caadi ah | Adeegyada aad u baahan karto | Maxaad Bixinaysaa | | Xadidaadaha, Filashooyinka, iyo Macluumaad Kale oo Muhiim ah |
|---|---|---|---|---|
| | | Daryeel bixiye ku jira Shabakada (Waxaad bixinaysaa lacagta ugu yar) | Daryeel bixiye ku jira Shabakada aan ku jirin (Waxaad bixinaysaa lacagta ugu badan) | |
| **Haddii ilmahaagu u baahan yahay daryeel ilko ama indho** | Baaritaanka indhaha caruurta | Lacag la'aan waaye baaritaanka araga indhaha | Aan la daboolin | Lagu xadiday 1 baaritaan / 12 bilood |
| | Muraayadaha caruurta | Lacag la'aan, lacagta la jaro laguma dabaqayo. | Aan la daboolin | Xubnaha da'doodu tahay 19 iyo ka weyn waxay ku xaddidan yihiin $300 / 12 bilood; Xubnaha da'doodu ka yar tahay 19 jir waxay ku xaddidan yihiin 1 lammaane oo muraayado ah iyo muraayado/sannad ama muraayadaha indhaha ee lagu daboolay 50% caymiska wadaaga ah |
| | Baaritaanka ilkaha caruurta | Aan la daboolin | Aan la daboolin | Midna |

## Adeegyada Laga Reebay iyo Adeegyada Kale ee la Daboolay:

**Adeegyada Qorshahaagu Guud ahaan Aanu Daboolin (Ka eeg xeerkaaga ama dhukumiintiga qorshahaaga iyo liistada adeeg kasta kale adeegyada laga reebay.)**

- Qaliinka qurxinta
- Daryeelka ilkaha (dadka waaweyn iyo ilmaha)
- Aalada caawiminta maqalka
- Daryeelka mudada dheer
- Daryeelka aan degdega ahayn markaad u safrayso meel ka baxsan Maraykan.
- Kalkaaliyaha shaqada gaarka ah
- Daryeelka lugaha caadiga ah
- Barnaamijyada dhimista miisaanka

**Adeegyada kale ee la daboolay (xadidaadyada ayaa laga yaabaa in lagu dabaqo adeegyadan. Kani maaha liis dhamaystiran. Fadlan arag dhukumiintiga qorshahaaga.)**

- Duritaanka maqaarka (xadka 20 booqasho / sanad)
- Qaliinka cayilka
- Daryeelka xubnaha laf-dhabarta (xadidaada 20 booqasho / sanadka)
- Daaweynta dhalmo la'aanta ($ 50,000 xadka caafimaadka; $ 35,000 xadka daawada / nolosha)
- Daryeelka indhaha ee caadiga ah (dadka waaweyn)

**Xuquuqdaada inaad sii wadato caymiska:** Waxaa jira hay'ado ku caawin kara haddii aad rabto inaad sii wadato caymiskaaga kadib markay dhamaato. Macluumaadka xiriirka ee hay'adahaas ayaa lagu muujiyay shaxda hoose. Ikhtiyaarada kale ee caymiska ayaa laga yaabaa inay diyaar kuu yihiin, sidoo kale, oo ay ku jiraan iibsashada caymiska shakhsi ahaaneed iyada oo loo marayo Caymiska Caafimaadka ee Goobta Suuqa. Wixii macluumaad dheeraad ee Goobta Suuqa, booqo www.HealthCare.gov ama wac 1-800-318- 2596.

**Xuquuqda Cabashadaada iyo Racfaanka:** Waxaa jira wakaalado ku caawin kara haddii aad cabasho ka qabto qorshahaaga ee diidmada dalbashada sheegashada. Cabashadan waxa loo yaqaan cabasho ama rafcaan. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqdaada, fiiri sharraxaadda faa'iidooyinka aad ka heli doonto sheegashada caafimaadkaas. Dhukumiintiyadaada qorshaha waxa kale oo ay bixiyaan macluumaad dhamaystiran oo ku saabsan sida loo gudbiyo dalbashada sheegasho, rafcaan, ama cabasho sabab kasta oo aad qorshahaaga ah. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqdaada, ogeysiiskan, ama kaalmada, la xiriir wakaaladaha shaxda hoose.

**Macluumaadka Xiriirka ee Xuquuqdaada si aad u sii wado caymiska iyo Cabashadaada iyo Xuquuqaha Racfaanka:**

| | |
|---|---|
| Adeegyada Xubinta Kaiser Permanente | 1-888-901-4636 (TTY: 711) ama www.kp.org |
| Waaxda Shaqada ee Dheefaha Shaqaalaha Maamulka Amniga | 1-866-444-EBSA (3272) ama www.dol.gov/ebsa/healthreform |
| Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha, Xarunta Macluumaadka Macmiilka iyo Kormeerka Caymiska | 1-877-267-2323 x61565 ama www.cciio.cms.gov. |
| Waaxda Caymiska ee Washington | 1-800-562-6900 ama www.insurance.wa.gov |

**Qorshahani ma bixiyaa daboolka ugu Yar ee Muhiimka ah? Haa**

Caymiska Muhiimka ah ee Ugu Yar guud ahaan waxaa kamid ah qorshayaasha, caymiska caafimaadka ee laga heli karo Goobaha Suuqa ama siyaasadaha kale ee suuqa gaarka ah, Medicare, Medicaid, CHIP, TRICARE, iyo qaar kale oo caymis ah. Haddii aad u qalanto noocyo gaar ah oo ah Caymiska Muhiimka ah ee Ugu Yar, waxaa laga yaabaa inaadan u qalmin dhaafitaanka canshuurta khidka caymiska ee bilaha ah.

**Qorshahani miyuu la kulmay Heerarka Qiimaha Ugu Yar? Haa**

Haddii qorshahaada aanu buuxin Heerarka Qiimaha Ugu Yar, waxa laga yaabaa inaad u qalanto dhaafitaanka canshuurta khidka caymiska ee bilaha ah si ay kaaga caawiso inaad bixiso qorshe iyada oo loo marayo Goobaha Suuqyada.

**Adeegyada Helitaanka Luuqada:**

Spanish (Español): Para obtener asistencia en Español, llame al 1-888-901-4636 (TTY: 711).
Tagalog (Tagalog): Kung kailangan ninyo ang tulong sa Tagalog tumawag sa 1-888-901-4636 (TTY: 711).
Chinese (中文): 如果需要中文的帮助，请拨打这个号码 1-888-901-4636 (TTY: 711).
Navajo (Dine): Dinek'ehgo shika at'ohwol ninisingo, kwiijigo holne' 1-888-901-4636 (TTY: 711).

***Si aad u aragto tusaalooyin ku saabsan sida qorshahan uu u dabooli karo kharashyada sambalada xaalad caafimaad, eeg qaybta xigta.***

## Waxyaabaha ku saabsan Tusaalooyinkan Caymiska:

**Kani maaha qiimeeye kharash** Daawaynta la tusay waa tusaale uun sida qorshahan u dabooli karo daryeelka caafimaadka. Kharashyadaada saxda ah way ka duwanaan doonaan iyadoo ku xiran daryeelka saxda ah ee aad hesho, qiimaya daryeel bixiyeyaasha ka qaadaan, iyo arrimo kale oo badan. Diirada saar qadar kharash wadaagga (lacagaha lagaa jaro, lacag bixinta wadaaga ah iyo caymiska wadaaga ah) iyo adeegyada laga saaray ee hoos yimaada qorshaha. Isticmaal macluumaadkan si aad u barbar dhigto qaybta kharashyada aad ku bixin karto qorshe caafimaadka kala duwan. Fadlan ogow tusaalooyinkan caymisku waxay ku salaysan yihiin caymiska shakhsi kaliya.

### Peg wuxuu leeyahay ilmo
(9 bilood oo daryeelka dhalmada kahor ah ee shabakada ka tirsan iyo dhalmada isbitaalka)

- **Lacagta la jaro ee qorshahan guud ahaan** **$0**
- **Lacag bixinta wadaaga ah ee takhasuslaha** **$15**
- **Lacag bixinta wadaaga ah ee isbitaal (xarun)** **$100**
- **Kuwa kale (shaqada dhiiga) caymiska wadaaga ah** **$0**

**Dhacdadan TUSAALAHAN waxaa kamid ah adeegyada sida**
Booqashooyinka xafiiska takhasuska ah *(daryeelka dhalmada ka hor)*
Adeegyada Xirfadlaha Dhalmada Dhalaanka/Dhalmada
Adeegyada Dhalmada Dhalaanka/Dhalmada
Baaritaanka cudur (sawiritanka ultrasound iyo shaqada dhiiga)
Booqashada Takhasusle (*Suuxin)*

| **Tusaalaha Wadarta Kharashka** | **$12,700** |
|---|---|
| **Tusaalahan, Peg wuxuu bixinayaa:** | |
| *Kharash wadaagista* | |
| Lacagaha laga jaro | $0 |
| Lacag bixin wadaag ah | $200 |
| Caymiska wadaaga ah | $0 |
| *Waxa aan la daboolin* | |
| Xadiidaadaha iyo ka reebitaanada | $20 |
| **Wadarta Peg uu bixinayo waa** | **$220** |

### Maaraynta Nooca 2 ee Sokorowga Joe
(sanad daryeelka caadiga ah ee shabakada ka tirsan ee xaalad si wanaagsan loo xakameeyay)

- **Lacagta la jaro ee qorshahan guud ahaan** **$0**
- **Lacag bixinta wadaaga ah ee takhasuslaha** **$15**
- **Lacag bixinta wadaaga ah ee isbitaal (xarun)** **$100**
- **Kuwa kale (shaqada dhiiga) caymiska wadaaga ah** **$0**

**Dhacdadan TUSAALAHAN waxaa kamid ah adeegyada sida**
Booqashooyinka xafiiska dhakhtarka daryeelka aasaasiga ah *(ay ku jirto baritaanka cudurka)*
Baaritaanka cudur (shaqada dhiiga)
Daawooyinka dhakhtar qoro
Agabka caafimaadka ee waara (mitirka kulukoosta)

| **Tusaalaha Wadarta Kharashka** | **$5,600** |
|---|---|
| **Tusaalahan, Joe wuxuu bixinayaa:** | |
| *Kharash wadaagista* | |
| Lacagaha laga jaro | $0 |
| Lacag bixin wadaag ah | $600 |
| Caymiska wadaaga ah | $0 |
| *Waxa aan la daboolin* | |
| Xadiidaadaha iyo ka reebitaanada | $0 |
| **Wadarta Joe uu bixinayo waa** | **$600** |

### Jabitaanka fudud ee Mia
(Booqashada qolka degdega ah ee daryeell bixiye kamid ah shabakada iyo daryeelka dabagalka)

- **Lacagta la jaro ee qorshahan guud ahaan** **$0**
- **Lacag bixinta wadaaga ah ee takhasuslaha** **$15**
- **Lacag bixinta wadaaga ah ee isbitaal (xarun)** **$100**
- **Kuwa kale (raajo) caymiska wadaaga ah** **$0**

**Dhacdadan TUSAALAHAN waxaa kamid ah adeegyada sida**
Daryeelka qolka xaaladaha degdega ah (kamid yihiin agabka caafimaad)
Baaritaanka cudur (raajo)
Agabka caafimaadka ee waara (biraha curyaanka)
Adeegyada baxnaaninta (daaweynta jir ahaaneed)

| **Tusaalaha Wadarta Kharashka** | **$2,800** |
|---|---|
| **Tusaalahan, Mia wuxuu bixinayaa:** | |
| *Kharash wadaagista* | |
| Lacagaha laga jaro | $0 |
| Lacag bixin wadaag ah | $400 |
| Caymiska wadaaga ah | $300 |
| *Waxa aan la daboolin* | |
| Xadiidaadaha iyo ka reebitaanada | $0 |
| **Wadarta Mia uu bixinayo waa** | **$700** |

Qorshahan wuxuu mas'uul ka noqon doontaa kharashyada kale ee TUSAALAHAN adeegyadan la daboolay.